



REPUBLIC OF SOMALILAND

Jamhuuriyadasoomaaliland

A bill for an Act entitled
Qabyo Qoraalka Xeerka

THE PUBLIC FINANCE MANAGEMENT AND ACCOUNTABILITY ACT, 2015
XEERKA QARANKA EE MAAREYNTA MAALIYADDA IYO XISAABTANKA 2015.

**AN ACT TO REPEAL THE BODY OF LAWS DEALING WITH PUBLIC FINANCE AND ALL THE LAWS
AMENDATORY THERETO AND TO ENACT PUBLIC FINANCE MANAGEMENT AND ACCOUNTABILITY
ACT OF SOMALILAND AND LEGISLATE FOR INCIDENTAL MATTERS**

WAA XEER NASAKHAYA XEERARAKA LA XIDHIIDHA MAALIYADDA QARANKA IYO DHAMAAN SHURUUCDA LA BEDELAY ISLA MARKAANA
DAJINAYAA MAAREYNTA MAALIYADDA IYO XISAABTANKA JAM.SOOMAALILAND, IYO ARRIMAHA KALE EE LA HAL-MAALA.

TABLE OF CONTENTS

PART I: PRELIMINARY.....	6
PART II: ECONOMIC POLICY.....	10
1. Responsibilities of the cabinet	10
2. Development of economic policy and advice by the Minister.....	11
PART III: BUDGETING.....	12
3. Purpose of Part III of the Act.....	12
4. Budget Framework	12
5. Submission of Estimates of Revenues and Expenditures.....	13
6. Indicative Preliminary Estimates of Revenues and Expenditure Framework.....	14
7. Presentation of the Finance Bill to the House of Representatives... ..	15
8. Report on Loans, Grants, and Guarantees.....	17
9. Supplementary estimates.....	17
10. Classified expenditure.....	18
11. Excess expenditure	19
12. Provision if Appropriation Act not in force.....	20
13. Duration of appropriations and warrants.....	20
14. Economic, Finance and Trade Committee of the House of Representatives.	20
15. Budget Office.....	21
16. Failure to meet Budget Requirements	22
PART IV: CONTROL AND MANAGEMENT OF PUBLIC FINANCE	22
17. Supervision, control and management of public finances.....	22
18. Regulations and directives.....	24
19. Powers of the Secretary to the Treasury.....	24
20. Designation, powers, and duties of the Accountant General.....	26
21. Designation, powers, and duties of the Government Internal Auditor.....	28
22. Appointment and duties of accounting officers.....	29

Tusmada Xeerka

Qaybta I-Hordhac

Qaybta II- Siyaasadda dhaqaalaha

1. Mas’uliyadda Golaha Wasiirada
- 2...Horumarinta siyaasadda dhaqaalaha iyo talada Wasiirka

Qaybta III- Miisaaniyadda

3. Ujeedada xeerka ee qaybta III
4. Qaab dhismeedka Miisaaniyadda
5. Gudbinta Odooroska Dhakhliga iyo kharashaadka wasaaradaha
6. Cadayn hordhaca ah ee odoroska dakhliga iyo qaab dhismeedka kharashka
7. Bandhigida Mashruuca Sharci ee Maaliyadda ee loo jeedsho Golaha Wakiilada
8. Warbixinta Amaahaha, Deeqaha, iyo Damaanadaha
9. Qeexida Dheeriga ah ee Odooraska Miisaaniyadda
10. Kharashka Qarsoodiga ah
11. Kharashka Xad-dhaafka ah
12. Kharashka kutalogal ah intaan miisaaniyaddu aanay dhaqan gelin
13. Muddada Qoondooyinka iyo Awoodaha Kharashyada
14. Guddiga dhaqaalaha, maaliydda, iyo ganacsiga ee Golaha Wakiilada
15. Xafiiska Miisaaniyadda
16. Ku Guul Daraysiga Dhamaystirka Shuruudaha Miisaaniyadda

Qaybta IV. Illaalinta iyo Maaraynta Maaliyadda Qaranka

17. Kormeerka, xakamaynta, iyo Maamulida Maaliyadda Qaranka
18. Xeerarka iyo Awaamiir
19. Awoodaha Xoghayaha Khasnadda (Agaasimaha Guud)
20. Cayimida, Awoodaha iyo Waajibaadka Xisaabiyaha Guud
21. Cayimida, Awoodaha iyo Waajibaadka ee hantidhawraha Gudaha ee Dawladda
22. Magacaabidda iyo awoodaha saraakiisha xisaabiyeyaasha

PART V: MANAGEMENT OF THE PROPERTY OF THE STATE

23. General Policy on fixed assets30

PART VI PUBLIC FUNDS.....33

24. General Revenue Fund and other funds33
 25. Contingencies fund.....35
 26. Investment of and advances from the General Revenue Fund.....36
 27. Grants of credit.....36
 28. Issues from the General Revenue Fund.....37
 29. Accountant General's warrants.....37

PART VII: LOANS, GUARANTEES AND GRANTS38

30. Authority to raise loans38
 31. Moneys borrowed to be paid into the General Revenue Fund39
 32. Raising of loans39
 33. Repayment, conversion and consolidation of loans.....39
 34. Expenses of loans40
 35. Authority to guarantee loans.....40
 36. Beneficiary to reimburse all costs40
 37. Authority to receive grants41
 38. Amounts due on loans or guarantees to be charged on
 General Revenue Fund41
 39. Minister to specify particulars in annual estimates41
 40. Delegation by Minister42

PART VIII: PREPARATION, AUDIT AND EXAMINATION OF ACCOUNTS..42

41. Annual accounts.....42
 42. Annual and other reports.....43
 43. Duties of the Auditor General.....44
 44. Powers of the Auditor General.....45

Qaybta V. Maamulka Hantida Ee Qaranka

23. Siyaasadda Guud Ahaan Hantida Ma Guurta Ah

Qaybta VI. Maalka Qaran

24. Keydka dakhliga guud iyo keydka kale
 25. Sanduuqa ku talo galka dhacdooyinka lama filaankaa
 26. MAALGALINTA IYO SANDUUQA GUUD EE DAKHLIGA

27. *Deynsiinta*

28. *Lacagaha laga saarayo dakhliga guud*

29. *Awoodaha Kharash ee Xisaabiyaha Guud*

Qaybta VII AMAAHDA ,DEYMAHA IYO DEEQAHA

30. *Awooda lacag amaah lagu ururin karo*

31. *lacagta loo amaahshoin lagu baxsho sanduuqa Dakhliga Guud*

32. *Urursiga Deymaha*

33. *Dib u bixinta, Bedelaada iyo isku darka deymaha*

34. *Kharashka Deymaha*

35. *Awooda Damaanad qaadka Deymaha*

36. *ka faa'iidaystuhu wa inuu bixiyaa dhammaan Kharashka*

37. *awooda Qaashada Deymaha*

38. *Qadarka ku taagan deyn ahaan ama damaanad ahaan ee laga qaadayo sanduuqa Dakhliga guud*

39. *Wasiirku waa inuu cayimaa sifaha odoroska sanadlaha ah*

40. *Igmashada Wasiirka*

Qaybta VIII. Diyaarinta , Baadhista iyo Hubinta Xisaabaadka

41. *Xisaabaadka sanad laha ah*

42. *Xisaab xidhka sanadeedka iyo warbixinaha kale*

43. *Waajibaadka Hantidhawraha Guud*

44. *Awoodaha Hantidhawraha Guud*

45. Rights of the Auditor General to submit reports to the Minister...	47
46. Value for money audits	47
47. Delegation of functions.....	48
PART IX: CONTROL OF FINANCES OF PUBLIC AGENCIES, ETC.....	49
48. Accounts of public agencies etc.....	49
49. Control of public agencies	49
PART X: MISCELLANEOUS.....	51
50. Abandonment of claims etc and write off of public money and stores.....	51
51. Bank accounts.....	52
52. Offences.....	52
53. Penalties and surcharge.....	53
54. Amendment of the Second Schedule.....	55
55. Regulations.....	55
56. Coming into force, Repeals and savings.....	55
57. Transitional provisions	55
58. Precedence of this Act.....	55
59. Somali Text to Prevail	56
SCHEDULES.....	56
FIRST SCHEDULE: CONDITIONS FOR RISING OF LOANS.....	56
SECOND SCHEDULE: PROVISIONS FOR SUBMISSION OF ACCOUNTS...	58

45. <i>Xaqa uu Hantidhawraha Guud u leeyahay inuu gudbiyo warbixinta Wasiirka</i>
46. <i>.Baadhista Qiimo Lacageed</i>
47. <i>Igmashada Hawlaha</i>
<i>Qaybta IX. Illaalinta Maaliyadda, Wakaaladdaha Qaranka i.w.m</i>
48. <i>Xisaabaadka Wakaaladaha Qaranka</i>
49. <i>Illaalinta Wakaaladda Qaranka</i>
<i>Qaybta X. Qubanaha</i>
50. <i>Ka tanaasulka sheegashada, qiime tirista lacagta iyo alaabta Bakhaarada Qaranka</i>
51. <i>Xisaabaadka Bangiga</i>
52. <i>Dambiyada</i>
53. <i>Ganaaxyada iyo Dulsaarada (penalties and surcharge)</i>
54. <i>Wax ka badalka Jadwalka Labaad</i>
55. <i>. Xeer Nidaamiyayaal</i>
56. <i>Dhaqan galka , Nasakhaada iyo Keydinta</i>
57. <i>. Qaraarada Ku meel gaadhka ah</i>
58. <i>Mudnaanta Xeerkan</i>
59. <i>Qoraalka Somaliga ah ayaa mudnaanta leh oo la raacayaa</i>
Jadwalka
Jadwalka Koowaad: Shuruudaha Urursiga Deymaha
Jadwalka Labaad: Qodobada Maamulaaya gudbinta warbixinta Xisaabeedka

PART I: PRELIMINARY

1. This Act may be cited as the “public finance management and accountability act, 2015.
2. This act shall come into operation on a date appointed by the Minister by statutory instrument. Different dates may be appointed in respect of different provisions of this act. In this Act, unless the context otherwise requires:-
 - i. **“Accountant General”** means the person designated under Section 20 of this Act as an Accountant General [Chief Accountant] in accordance with Article 90 (3) of the Constitution;
 - ii. **“Audit Committee”** means a committee that receives audit reports, reviews them and follows up to ensure audit issues are being addressed by the accounting officer of the government entity.
 - iii. **“Accounting officer”** means a person designated under Section 22 of this Act as an accounting officer;
 - iv. **“Appropriation Act”** means any Act applying for a sum of money out of the General Revenue Fund to the service of a financial year;
 - v. **“Auditor General”** means the person appointed or deemed to have been appointed Auditor General under Article 90 [3] and Article 114 [1] of the Constitution;
 - vi. **“Bill”** means a Treasury bill issued under section 24 and in accordance with the second schedule to this Act;
 - vii. **“Bond”** means a bond issued under section 57 and in accordance with the first schedule to this Act;
 - viii. **“Budget”** means the process by which the Government sets levels of resources to collect and allocate spending of resources efficiently among all sectors to meet national objectives;

QAYBTA IAAD: Hordhac

1. Xeerkan waxa lagu magacaabi doonaa “Xeerka Maaraynta iyo Xisaabtanka (Xeer Lr. XX.2015.)
2. Xeerkani waa inuu dhaqan gali doonaa taariikhda uu u asteeyo (Xaddido) Wasiirku isaga oo ku soo saaraya sharci hoosaad. Taariikho kala duwan ayaa loo astayn (Xaddidi) karaa qodobada kala duwan ee Xeerkan.

Xeerkani, Haddii aanu nuxurku si kale u dhignayn

 - i. **“Xisaabiya Guud”**xisaabiyaha guud waa qofka lagu magacaabo sida uu Qorayo qodobka 20aad ee xeerkan iyo sida ku cad qodobka 90aad(3) ee dastoorka
 - ii. **“Guddi Hantidhawr”** Waa guddi hesha warbixinta hantidhawrka, dib u Eegta, hubisana in arrimaha hantidhawrka ee ku saabsan sarkaalka Haa’yad dawladeed ka tirsan
 - iii. **“Sarkaal Xisaabiye ah”** waa qofka loo magacaabay serkaal xisaabeed sida ku cad qodobka 22aad.
 - iv. **“Xeerka Qoondada”** waa inuu macnoheedu yahay sharciga loo adeegsado qadar lacag ah oo laga saarayo Keyda Dakhli Guud si loogu adeego Sannad maaliyadeedkaas.
 - v. **“Hantidhawraha Guud”** waxa weeye qofka loo magacaabay ama loo qaadan karo in loo magacaabay Hantidhawre Guud sida ku cad Qodobka 90aad (3) iyo 114aad (1) ee Dastuurka.
 - vi. **“Sendooyinka Khasnada Dawladda” (bills)** waa inuu macnaheedu sendooyinka qasnadda dawladda oo lagu soo saaray si waafaqsan Qodobka 24aad iyo si waafaqsan jadwal labaad ee Xeerkani.
 - vii. **“SEND” (bond)** waa inuu macnaheedu yahay sendada lagu soo saaray si ku cad Qodobka 57aad iyo si waafaqsan jadwal koobaad ee xeerkani;
- VII. **Miisaaniddu** waa habka Dawladdu khayraadkeeda ku urusato kuna kharash gasho siday si fiican u gudan lahayd u jeeddoyinka qaranka.

- viii. **“Chief executive officer ”** means the person who has responsibility for managing the affairs of a public organization;
- ix. **“Commitment”** means a contract or other legal commitment that results in expenditure for the Government;
- x. **“Currency point”** means the equivalent to two hundred and fifty United States Dollars
- xi. **“Expenditure vote”** means a group of estimates for which an appropriation is made by an appropriation Act or supplementary appropriation Act;
- xii. **“Financial year”** means a period of twelve months ending on 31 December;
- xiii. **“General Revenue Fund”** means the General Revenue Fund of Somaliland, also known as the Somaliland Income Fund, which is established under article 54 (2) of the Constitution;
- xiv. **“Government”** means the Government of the Republic of Somaliland;
- xv. **“Government entity”** means a Ministry, Department, Public Agency or any other government organization.
- xvi. **“Government Internal Auditor”** means a person designated under Section 22 of this Act as a Government Internal Auditor;
- xvii. **“Internal audit ”** means a process to measure, evaluate and report to the management of an entity on the efficacy of the system of internal control used to ensure the validity of financial and other information;
- xviii. **“Internal control ”** means a set of systems to ensure that financial and other records are reliable, complete and ensure adherence to the entity’s management policies, the orderly and efficient conduct of the entity, and the proper recording and safeguarding of assets and resources;

- viii. **“Xoghayaha Sare ee Fulinta”** waa inuu macnaheedu yahay qofka ka masuulka ah in uu maamulo arimaha hay’ada dawladeed;
- IX. **Balanqaad:-** Go’aan oo qandaraas ah ama sharci keena kara kharash Dowladeed.
- x.. **“Lacag cayiman”** waxa weeye qadarka u dhigma laba boqol iyo konton dollarka Maraykanka ah.
- xi. **“Qoondayn Kharash”** waa inuu macnaheedu yahay odorosyo ku jira qoondada lagu sameeyay Xeerka Qoondada (appropriation law) ama xeer qoondo oo kaabis ah;
- xii. **“Sannad Maaliyadeed”** waa inuu macnaheedu yahay waqti laba iyo toban bilood ah oo ku dhamaanaya 31ka Diisambar;
- xiii. **Keydka Dakhli ee Guud”** waa inuu macnaheedu yahay Keyda Dakhli ee Guud ee Soomaaliland ee lagu aasaasay sida ku cad Qodobka 54aad (2) ee Dastuurka
- xiv. **“Dawlad”** waa inuu macnaheedu yahay dawladda Jamhuuriyadda Soomaaliland
- xv. **“Haay’ad Dawladeed”** waa inuu macnaheedu yahay Wasaarad, Waax, Haay’ad Dawladeed ama haay’ad kasta oo kale oo dawladda ka tirsan.
- xvi. **“Hantidhawrka Gudaha ee Dawladda”** waa inuu macnaheedu yahay qofka lagu magacaabay sida ku cad qodobka 21aad ee Xeerkani ee loo magacaabay Hantidhawraha Guud ee Dawladda si loo hubiyo ansaxsanaanta maaliyadda iyo warbixinaha kale;
- xvii. **“Hantidhawrida Gudaha”** waa inuu macnaheedu yahay habka lagu cabiro, qiimeeyo, laguna warbixiyo maamulka haay’adeed ee la xidhiidha hufnaanta nidaamka dabrida gudaha (hubinta gudaha) ee loo adeegsado in lagu habsado ansaxnimada Maaliyadda iyo warbixinaha kale;
- xviii. **“Illaalinta gudaha”** waa inuu macnaheedu yahay habka lagu cabiro, qiimeeyo, laguna warbixiyo maamulka haay’adeed ee la xidhiidha hufnaanta nidaamka dabrida gudaha (hubinta gudaha) ee loo adeegsado in lagu habsado ansaxnimada Maaliyadda iyo warbixinaha kale;

- xix. **“Internationally Acceptable Auditing Standards”** means auditing and assurance standards issued by the International Organization of Supreme Audit Institutions (INTOSAI) and/or International Auditing and Assurance Standards Board under the auspices of the International Federation of Accountants
- xx. **“Loan”** means any loan raised by the government
- xxi. **“Local government authority”** means a district or regional council referred to in article 109 of the Constitution;
- xxii. **“Minister”** means the Minister responsible for finance;
- xxiii. **“Outputs”** means goods produced or services provided;
- xxiv. **“Propriety”** means the requirement that expenditure and receipts must be dealt with in accordance with the intentions of the House of Representatives;
- xxv. **“Public moneys”** means
- (a) The public revenues of government; and
 - (b) any trust or other moneys held, whether temporarily or otherwise, by an officer who may or may not be a public officer, in his or her official capacity, either alone or jointly with any other person;
- xxvi. **“Public officer”** means a person holding or acting in an office in the public service;

- xix. **“Xeerrarka Caalami ahaan ee Waafaqsan xaga Baadhista”** waa inuu macnahoodu yahay heerarka habsami ee baadhista iyo hubinta ee ay soo saareen Ururka Caalamiga ah ee Haay’ada Sare ee Baadhista (INTOSAI) ama Gudidda Caalamiga ah ee Hubinta iyo Baadhista ee ka hoos shaqeeya Isu taga Caalamiga ah ee Xisaabaabiyayaasha.
- xx. **“Dayn”** waa inuu macnahedu yahay daynka ay dawladu qaadato;
- xxi. **“Maamulka Dawladdaha Hoose”** waa inuu macnaheedu yahay degmada ama gobolka lagu xusay Qodobka 109aad ee Dastuurka;
- xxii. **“Wasiir”** waa inuu macnahiisu yahay Wasiirka ka masuulka ah Maaliyadda;
- xxiii. **“Wax-Soo-Saar”** waa inuu macnaheedu yahay badeecadda iyo adeegyada la bixiyo
- xxiv. **Hufnaan”** waa inuu macnaheedu yahay shuruudaha u dagan in ay yeeshaan kharash iyo risiidhada ay tahay in lala macaamilo iyada oo la raacayo ujeedooyinka Golaha Wakiilada, gaar ahaana, kuwa lagu sheegay gudida dhaqaalaha;
- xxv. **“Maaliyadda Dawladda” waa** inuu macnaheedu yahay:
- a) Dakhliga dawladda;
 - b) Amaano-hayn (trust) kasta ama lacagaha kale ee loo hayo ku meel gaadh ahaan ama sabab kalaba, uuna u hayo sarkaal kaas oo ah ama noqon kara sarkaal dawladeed, isaga oo awoodiisa rasmiga ah adeegsanaya, kali ahaan ama isaga oo ay weheliyaan qof kale;
- xxvi. **“Sarkaal Dawladeed”** waa inuu macnaheedu yahay qofka haya ama matalaya xafiis qaranka u adeega;

- xxvii. **“Public agency”** means an enterprise, authority, body or entity to which section 48 of this Act applies. Notwithstanding paragraph (b) a public agency is:-
- (a) A Corporate body established under any act other than the Companies Act or, a local government council; and
 - (b) A company registered under the companies Act in which the government or a state enterprise is able to:
 - (i) Control the composition of the board of directors of the company
 - (ii) cast, or control the casting of more than fifty percent of the maximum number of votes that might be cast at a general meeting of the company; and
 - (iii) control more than fifty percent of the issued share capital of the company, excluding any part of that issued share capital that carries no right to participate beyond a specified amount in a distribution of either profits or capital.
- xxviii. **“Public property”** means resources owned by the government or in the custody or care of the government;
- i. **“Regularity”** means the requirement for all items of expenditure and receipt to be dealt with in accordance with the legislation authorizing them, including this Act and any applicable delegated authority, regulations, directives and instructions issued under this Act;
 - ii. **“Resources”** includes moneys, stores, property, assets, loans and investments;
 - iii. **“Secretary to the Treasury”** means a Director General of the ministry responsible for finance designated or deemed to have been designated as a Secretary to the Treasury by the President of the Republic of Somaliland;

- xxvii. **“Haa’yad Dawladeed”** waa inuu macnaheedu yahay ganacsi, haay’ad ama wakaalad taas oo Qodobka 48aad ee Xeerkan lagu dhaqo. Iyada oon la raacayn qodob hoosaadada (b) wakaalad dawladeed waa inuu macnaheedu yahay:
- (a) Haay’ad ku aasaasan xeer aan ahayn xeerka shirkadaha; ama golayaasha deegaanada; iyo
 - (b) Shirkad ku aasaasan Xeerka Shirkadaha taas oo dawladdu ama qaranku ay awood u leedahay:
 - (i) Uu maamulo cida ka mid noqonasa Gudida Agaasinka ee shirkadda;
 - (ii) Uu dhiibto, ama uu xukumo cidda dhiibanasa in ka badan boqolkiiba konton oo ah tirada ugu faraha badan ee tirada codadka laga dhiiban karo kulanka guud ee shirkadda;
 - (iii) Uu xukumo in ka badan boqolkiiba konton ee saamiyada raasamaal ee la soo saaray ee shirkadda, marka laga saaro qayb kasta oo ka mid ah saamiyadaasi raasamaal ee la soo saaray een lahayn wax xuquuq ah oo ay kaga qayb galaan oon ka ahayn qadarka loo cayimay ee loo qaybin doono macaash ahaan ama raasamaal ahaan.
- xxviii. **“Hantida Dawladda”** waa inuu macnoheedu yahay khayraadka ay dawladdu leedahay ama ku jira gacanta ama haynta dawladda;
- i. **“Nidaamin”** waa inuu macnaheedu yahay shuruudaha loo adeegsado wixii kharash ah iyo risiidhada qaabka loola macaamilayo iyada oo loo eegayo xeerasha fasaxaya, oo ay ku jiraan Xeerkan iyo haay’adakasta oo kale oo la igamaday, xeer nidaamiye, awaamiirta, iyo tilmaan bixinaha lagu soo saaray si waafaqsan Xeerkan;
 - ii. **“Khayraad”** waxa ku jira lacagta, bakhaarada, hantida, kheyraadka, amaahda, iyo maalgalinta;
- III. Xooghaya Qasnadu“waa agaasimaha guud ee wasaaradda ka masuulka ah maaliyadda cayiman ama u cayimay madaxwaynaha jamhuuriyadda soomaaliland xoghayaha qasnadda

- iv. **“Statutory expenditure ”** means expenditure charged on the General Revenue Fund by the Constitution or any act of the House of Representatives, including this Act, but does not include the expenditure of moneys appropriated or granted by an appropriation act or supplementary appropriation act; and;
- v. **“Supplementary appropriation act ”** means any act, the purpose of which is to supplement the appropriation already granted by an appropriation act.

PART II: ECONOMIC POLICY

1. Responsibilities of the Cabinet

The Cabinet shall be responsible for the following:

- (1) To approve the Government’s broad strategic objectives and priorities for budgetary policies for the next fiscal year and for the next two successive years after the relevant fiscal year as outlined in the Budget Framework Paper;
- (2) To approve the Budget Framework Paper, especially the targets for aggregate revenues, aggregate expenditures, fiscal balance
- (3) To approve the annual finance bill prepared by the Minister;
- (4) to consider and adopt consolidated quarterly budget execution report prepared by the Minister;
- (5) to consider and adopt the report of the State Finances of the year preceding the year of the consolidated budget as well as the budget execution report prepared by the Minister

IV..**Kharash Qaanuuni Ah:** Waxa laga bixiyo keydka dakhliga guud oo dastuurku waajibiyay ama xeer Golaha Wakiilada ah oo ahayn mid hore loo qoondeeyey.

- v. Xeerka loo qoondeeyay e dheeriga ah “waa xeerkasta ujeedadiisu tahay in u dheeri ku noqdo qoondadii la sharciyeeyay qoondadii xeerka ahayd .

Qaybta II: Siyaasadda Dhaqaalaha

1. Masuuliyada Golaha wasiirada

Golaha wasiirada aya ka masuula sida hoos ku xusan :

- (1) Oggolaanshaha hadafkeeda ballaadhan ee Dowladda iyo mudnaanta siyaasadaha miisaaniyadda ee sannadka soo socda iyo labadii sano ee ku xiga ka dib markii sanadkii la soo dhaafay xisaabeedka sida ku cad habka qaabdhismeedka miisaaniyadda ;
- (2) Oggolaanshaha qaab dhismeedka Miisaaniyadda , gaar ahaan bartilmaameed u ah dakhliga wadar ahaan, kharashaadka wadar ahaan, isu dheelitirka xisaabeedka.
- (3) Si aad loo ansixiyo sharcigan maaliyadda sanadlaha wasiirku diyaar gareeyey
- (4) Si ay u eegaan, qaaddaana warbixin fulinta miisaaniyad-biloodle ah oo midaysan uuna diyaariyay Wasiirku ;
- (5) Tixgalinta iyo warbixinta dhaqaalaha qaranka ee sanadkii la soo dhaafay ee miisaaniyadda ood koobaya sidoo kale warbixin fulinta miisaaniyadda uu diyaariyay wasiirku .

2. Development of economic policy and advice by the Minister

(1): The Minister shall develop and implement a Macro-Economic and Fiscal Policy Framework for Somaliland and for this purpose shall:-

- (a) advise Government on the total of resources to be allocated to the public sector and the appropriate level of resources to be allocated to individual programmes within that sector;
- (b) supervise and monitor the public finances; and
- (c) co-ordinate the international and inter-governmental financial and fiscal relations of Somaliland.

(2):The Minister shall ensure that the House of Representatives is kept informed of the:-

- (a) current and projected state of the economy;
- (b) finances of the Government; and
- (c) fiscal policy of the Government

2. *Dejinta Siyaasadda Dhaqaalaha iyo Talada Wasiirka*

1. Wasiirku waa inuu dejin doonaa isla markaana fulin doonaa siyaasad dhaqaale (macro-economics) iyo qaab Siyaasadeed maaliyadeed oo dalka Jamhuuriyadda Soomaaland ku socoto, si uu u qabto hawlahaan soo socda:
 - a) Waxa uu kala talin doonaa dawladda kheyraadka ay tahay in guud ahaan loo qoondeeyo qaybta dawladda iyo heerka ku habboon ee khayraadka ay tahay in loo qoondeeyo mashaariicda gaarka ah oo ka mid ah qaybtaasi;
 - b) Waxa kormeeri doona una kuur gali doona maaliyadda dawladda; iyo
 - c) Isu duwidda xidhiidhka maaliyadeed ee ka dhaxeeya Soomaaliland iyo dawladdaha Caalamka.
2. Wasiirku waxa uu hubin doonaa in Golaha Wakiilada lagu wargeliyey:
 - a) Dhaqaalaha hadda jira iyo dhaqaalihii ku talagalka ahaa ee dawladda;
 - b) Maaliyadda Dawladda, iyo;
 - c) Siyaasadda maaliyadeed ee dawladda

PART III: BUDGETING

3. Purpose of Part III of the Act.

(1) Part III of the Act provides for and regulates budget procedure for a systematic and efficient budget process together with other matters connected therewith. It sets out the processes leading to the preparation and submission of the national budget, the Finance Bill, to the House of Representatives, responsibilities of those charged with its preparation and submission of the national budget to the House of Representatives.

4. Budget Framework

(1) The Minister shall cause the budget to be prepared, and submitted by the Minister to the cabinet, based on a Macro-Economic and Fiscal Policy Framework.

(2) For purposes of Sub-section 5 (1) of this Act, the Minister shall, not later than the last day of June in each financial year, prepare and lay before the House of Representatives a three-year Macro-Economic and Fiscal Policy Framework and programmers for the economic and social development in preparation of the final submission estimates of revenue and expenditure for the coming financial year.

(3) The Minister shall, not later than the last day of June in each financial year and in preparation for the submission of estimates and expenditures for the coming financial year, submit and lay before the cabinet, indicative preliminary revenue and expenditure framework of the Government for the coming financial year.

(4) Each minister shall cause to be prepared and submitted to the Minister of Finance a Policy Statement of the relevant ministry on the preliminary estimates and expenditures submitted under Sub-section 5 (3) of this Act.

Qaybta III : Miisaaniyadda

3. Ujeedada Qaybta III ee xeerkan

1. Qaybta III ee Xeerku waxa ay ina siinaysaa habsami u maamulida, habraaca miisaaniyadda iyo qaab nidaamsan oo ka midho dhaliya arrimaha kale ee ku xidhan , Waxanay dajinaysaa habraacyada keenaya diyaarinta iyo u gudbinta miisaaniyadda dawladda, iyo xeerka Sharci ee Maaliyadda, Golaha Wakiilada, masuuliyadaha kuwa masuul looga dhigay diyaarinteeda iyo gudbinta miisaaniyadda dawladda Golaha Wakiilada

4. Qaab-dhismeedka Miisaaniyadda

1. Wasiirku wuxuu sababi doonaa in miisaaniyadda la diyaarsho, waxanu u gudbin doonaa Golaha Wakiilada, iyadoo lagu salaynayo dhaqaalaha guud iyo qaab-dhismeedka siyaasadda Maaliyadda.
2. Ujeedada qodob hoosaadda 5(1) ee Xeerkan, Wasiirku muddo aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa bisha Lixaad (June) ee sannad maaliyadeed kasta, waa inuu diyaariyaa, wuxuuna hordhigi doonaa Golaha Wakiilada qaab dhismeedka siyaasadda lacagta iyo dhaqaalaha guud oo saddex sannadood ah iyo barnaamijyo dhaqaalaha ah iyo horumarinta bulshada oo ah diyaarintii odoroskii u danbeeyay ee dakhli ee gudbinta odoroska ugu danbeeya ee dakhliga iyo kharashka sannad maaliyadeedka soo socda.
3. Wasiirku waa inuu, muddo aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa ee bisha June ee sannad maaliyadeed kasta iyo inta lagu gudo jiro waxa uu diyaarin doonaa una gudbin doonaa Golaha Wakiilada odorosyada iyo kharashaadka sannad maaliyadeedka soo socda, tasmada dakhliga hor dhaca ah iyo qaab-dhismeedka kharashka dawladda sannad maaliyadeedka soo socda.
4. Wasiir kastaa waa inuu soo saaro in lagu diyaariyo looguna gudbiyo Wasiirka maliyadda Warbixin Siyaasadeed ku saabsan wasaaradda ay khuseyso oo ah odoroska hordhaca ah iyo kharashaadka loo soo gudbiyay sida ku xusan qodob hoosaadka 5aad(3) ee Xeerkan

(5) A policy Statement prepared under Sub-section 5 (4) of this Act shall be in a form prescribed by the Minister responsible for finance and shall have specific details and the extent of achievement of objective targets on money received and expended.

(6) The Minister shall issue, not later than the last day of July in each financial year, budget circulars, guidelines and dates by which information is required, to accounting officers required to submit budgets as in Sub-section 6 (1) of this Act.

5. Submission of Estimates of Revenues and Expenditures

(1) The head of a government ministry, department, local or regional government, commission, and any other public body that receives appropriations shall submit to the Minister in the manner so prescribed preliminary estimates of revenues and expenditures of that ministry, department, local or regional government, commission, or public body for the following financial year, not later than the last day of August in each financial year.

(2) Estimates prepared and submitted under Sub-section 6 (1) of this Act shall be laid before the cabinet by the Minister but estimates of constitutional bodies whose expenditures are a direct charge on the General Revenue Fund shall be laid without amendments, however they may have recommendations made by the Government.

(3) The Minister responsible for finance shall cause to be prepared, approved by cabinet and submitted and laid before the House of Representatives in each financial year but in any case not later than the first day of October in the financial year, estimates of revenue and expenditure of the Government of Somaliland prepared under Sub-section 6 (2) of this Act for the next financial year in accordance with Article 55 of the Constitution.

5. Warbixin siyaasadeedka la diyaariyay ee ku xusan qodob hoosaadda 5aad(4) ee Xeerkan wuxuu ahaan doonaa qaabka uu cayimo Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda waxaanu lahaan doonaa faahfaahino dheeraad ah iyo xaddiga lagu gaadhay lacagta la helay iyo tan la kharashgareeyay hadafyada bartilmaameedka ahaa.

6. Wasiirku waa inuu soo saaro, wakhti aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa ee bisha Todobaad ee sannad maaliyadeed kasta, wareegtada miisaaniyadda, hagayaasha, iyo taariikhaha warbixinta looga baahanyahay, maamulada xisaabaadkana inay u gudbiyaan miisaaniyadda sida ku xusan qodob hoosaadda 6aas (1) ee Xeerkan.

5.. Gudbinta Odooroska Dakhliga iyo Kharashaadka.

1. Madaxa wasaarad dawladeed, waax, dawladda hoose ama gobolada, komishan, iyo haay'ad kale oo dawladeed taasi oo hesha qoondaymo waa inay u gudbiyaan Wasaaradda iyaga oo raacayo qaabka loo dajiyay odoroska hordhaca ah ee dakhliga iyo kharashaadka wasaaradaas, waaxdaas, dawladda hoose iyo gobolada, komishanka, ama komishanka dawladda ee sannad maaliyadeedka soo socda, wakhti aan ka dambayn maalinta ugu danbaysa ee bisha Sideedaad ee sannad maaliyadeed kasta.

2. Odooroska lagu diyaariyay lana gudbiyay ee ku xusan qodob hoosaadka 6aad(1) ee Xeerkan waa in uu Wasiirku hordhigaa Golaha Wakiilada laakiin odoroska haay'adaha dastuuriga ah kuwaasi oo kharashaadkoodu si toos ah looga gooyo keydka Dakhliga Guud waxaa la soo hor dhigi doonaa iyadoon lagu samayn wax wax ka bedel ah, si kastaba ha ahaatee waxay yeelan kartaa soo jeedimo ay samaysay Dawladdu.

3. Wasiirka ka masuulka ah maaliyaddu waa inuu soo saaro in lagu diyaariyo, gudbiyo lana hordhigo Golaha Wakiilada sannad maaliyadeedkasta laakin xaalad kasta waa in aanay ka dambayn maalinta ugu horaysa ee bisha Tobanaad ee sannad maaliyadeedka, odoroska dakhliga iyo kharashka dawladda Soomaaliland ee la diyaariyay sida ku xusan qodob hoosaadka 6aad(2)

6. Indicative Preliminary Estimates of Revenues and Expenditure Framework

- (1) The indicative preliminary revenue and expenditure framework of the Government for the coming financial year prepared and submitted to the House of Representatives as in Sub-section 5 (3) of this Act shall be submitted immediately by the Speaker of the House of Representatives to the Economic, Finance and Trade Committee, and Sessional Committees of the House of Representatives.
- (2) Each Sessional Committee shall review, discuss and make recommendations to the Economic, Finance and Trade Committee no later than the first day of August in each financial year.
- (3) The Economic, Finance and Trade Committee shall scrutinize the indicative preliminary estimates together with the reports of the Sessional Committees, and submit its recommendations to the Speaker who shall then send them to the Minister responsible for finance.
- (4) The Economic, Finance and Trade Committee shall submit the same recommendations together with those from the Sessional Committees under Sub-section 7 (3) of this Act to the House of Representatives for consideration. The recommendations of the House of Representatives shall then be sent to the Minister responsible for finance for action.
- (5) For the purposes of Sub-sections 7 (2) and 7 (3) of this Act and in exercise of their functions, the Economic, Finance and Trade Committee and the Sessional Committees may call a Minister or any person holding a public office or private individuals to submit memoranda or appear before it to give evidence

ee Xeerkan sannad maaliyadeedka ku xiga iyada oo la raacayo Qodobka 55 aad ee Dastuurka

6. Tasmada Hordhaca ah ee Odoroska Dakhliga iyo Qaab-Dhismeedka Kharashka

1. Tasmada hordhaca odoroska dakhliga iyo qaab-dhismeedka dawladda sannad maaliyadeedka soo socda ee la diyaariyay loona gudbiyay Golaha Wakiilada sida lagu xusay qodob hoosaadka 5aad(3) ee Xeerkan waxaa si dhakhso ah u soo gudbin doona Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, Gudida Ganacsiga, Dhaqaalaha iyo Maaliyadda, iyo guddiyada fadhiga joogtada ah ee Golaha Wakiilada.
2. Guddi kasta oo fadhi joogto ahi waxay dib u'eegi doontaa, lafaguri doontaa kuna samayn doontaa soo jeedimo ku saabsan Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Guddida Ganacsiga wakhti aan ka dambayn maalinta ugu horaysa ee bisha Sideedaad ee sannad maaliyadeed kasta.
3. Gudida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay si taxadar leh u baadhi doontaa tasmada hordhaca ah ee odoroska oo ay la socoto warbixinta guddida fadhiga joogtada ahi, una gudbinayaan soo jeedimo Gudoomiyaha kaasi oo dabadeeto u diri doona Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda.
4. Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsigu waxay u gudbin doonaan soo jeedin la mid ah oo ay la socoto kuwii ka yimid guddida fadhiga joogtada ah sida ku xusan qodob hoosaadka 7aad (3) ee Xeerkan Golaha Wakiilada si uu uga doodo. Soo jeedimaha Golaha Wakiiladda dabadeed waxaa loo diri doonaa Wasiirka masuulka ka ah Maaliyadda si uu talaabo u qaado.
5. Ujeedada qodob hoosaadka 7aad(2) iyo 7aad(3) ee Xeerkan iyaga oo gudanaya waajibkooda, Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga iyogudida fadhiga joogtada ah waxay u yeedhi karaan Wasiirka ama qof kasta oo haya xafiis qaran ama shakhsiyaad rayid ah si ay ugu soo gudbiyaan qoraal kooban ama u hor yimaaadaan si ay u bixiyaan caddaymo u siiyaan

7, Presentation of the Finance Bill to the House of Representatives

- (1) Subject to the Constitution and Sub-section 8 (2) of this Act, the Minister after approval of cabinet shall prepare and lay before House of Representatives as soon as is practicable and in any case not later than the first day of October in each financial year:-
- (a) estimates of the revenues and financing requirements of the Government for that year;
- (b) estimates of expenditure of the Government for that year allocated between those expenditure votes the Minister may consider appropriate and shall include for each expenditure vote:-
- (i) A statement of the purposes for which the vote is to be used;
- (ii) The identity of the accounting officer appointed under Section 23 of this Act responsible for the vote; and
- (iii) A statement of the classes of output expected to be provided from that vote during the year and the performance criteria to be met in providing those outputs; and
- (iv) An estimate of the amount required for guarantees to be issued for the following financial year.
- (2) For the purpose of Sub-sections 6 (3) and 8 (1) of this Act the Minister shall:-
- (a) At the time of presentation of the estimates as required, ensure that a complete report is made to the House of Representatives which:-
- (i) Sets out recent trends and developments as indicators of the economy of Somaliland
- (ii) Identifies the period considered by the Minister to be appropriate for the planning of the fiscal policy of the Government
- (iii) provides forecasts of the indicators in sub-paragraph (i) of this paragraph, for the current year and the period determined by the Minister under sub-paragraph (ii) of this paragraph;

7. U bandhigidda Xeer Sharciga Maaliyadeed ee loo Jeedsho Golaha Wakiilada

1. Iyadoo la raacayo Dastuurka iyo qodob hoosaadka 8aad(2) ee Xeerkan, Wasiirku wuxuu diyaarinayaa hordhigayaana Golaha Wakiilada sida ugu suurto gashan iyo xaalad kasta oo jirta ugu dambays maalinta ugu horaysa bisha Sideedaad (8) ee sannad maaliyadeed kasta:-
- a. Odorosyada dakhliga iyo maaliyadda ee looga baahanyahay in lagu Fuliyo hawlaha dawladda;
- b. Odoroska kharashka dawladda ee sannadkaas ee loo qoondeeyey qoondada kharashka Wasiirku wuxuu u tixgelinayaa qoondadaas mid muhiim ah waxaanu ku daraayaa kharashkaas:-
- i. Warbixin ku saabsan ujeedada kharashkaasi loo isticmaali doono;
- ii. Aqoonsiga xisaabiyaha lagu magacaabay Qodobka 23aad ee Xeerkan ee ka masuulka ah kharashka; iyo
- iii. Cadaymo ku saabsan kala saarida wax soo saarka la rajaynayo qoondada sanadka iyo hawsha lagu qabanaayo; iyo
- iv. Odorosyada ku saabsan xaddiga looga baahanyahay damaanad ahaan in lagu soo saaro sannad maaliyadeedkan soo socda.
2. Iyadoo la raacayo ujeedada qodob hoosaadka 6(3) iyo 8(1) ee Xeerkan, Wasiirku waa inuu:-
- a. Wakhtiga soo jeedinta odoroska haddii loo baahdo hubinayaa in warbixin dhamaystiran loo diyaariyey Golaha Wakiilada taasi oo:-
- (i) Bandhigaysa caqabadaha, iyo horumarka ay muujinayaan tusayaasha dhaqaalaha dalku;
- (ii) Astaynayaa muddada uu garto Wasiirku in ay ku habboontahay Qorshaynta siyaasad sannad maaliyadeedka dawladdu,
- (iii) Saadaal ka bixinaysa tusayaasha qodob-hoosaadka (i) ee faqraddan, ee sannadka lagu jiro iyo muddada uu go'aamiyo Wasiirku ee ku xusan qodob-hoosaadka (ii) ee qodob hoosaadkan:

(iv) supplies detailed information on recent fiscal developments and forecasts for the period determined by the Minister under sub paragraph (ii) of this paragraph of Sub-section 8 (2) of this Act in respect of:-

(aa) revenues

(bb) current and capital expenditures, the in-year reports

(cc) borrowing and debt servicing

(dd) contingent liabilities;

(ee) in-year reports of revenue and expenditures; and

(ff) any other information in respect of assets and liabilities that may be considered appropriate by the Minister; and

(b) provide the House of Representatives with any additional reports and information as may be necessary during the financial year

(3) Where the House of Representatives is dissolved or its term comes to an end earlier than three months before the commencement of any financial year, the estimates for that year may be laid before the House of Representatives as soon as practicable after the commencement of that year.

(4) The expenditure votes contained in the estimates, other than statutory expenditure, shall be included in an Appropriation Bill which shall be introduced into the House of Representatives to provide for the issue from the General Revenue Fund the sums necessary to meet that expenditure and the appropriation of those sums for the purposes specified in the bill.

(5) Every bill introduced to the House of Representatives shall be accompanied by its indicative financial implications, if any, on revenue and expenditure over the period of not less than two years after its coming into effect.

(iv) siinayaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan horumarka la taabankaro ee dhawaan la gaadhay iyo saadaasha muddada uu go'aaminayo Wasiirku sida ku xusan qodob-hoosaadka (ii) ee faqraddan ee qodob hoosaadka 8aad(2):-

(aa) dakhliga

(bb) raasamaalka jootada ah iyo kharashaadka, ee warbixinta sannadka Gudihisa.

(cc) amaahashada iyo bixinta daynta

(dd) daynta aan la saadaalin karin

(ee) warbixinta sannadka gudihisa ee dakhliga iyo kharashaadka; iyo

(ff) warbixin kasta oo kale marka laga hadlayo hantida iyo qaamaha kaasi oo uu Wasiirku u arko in ay muhiim tahay;

b. Waa inuu siin karaa Golaha Wakiilada warbixino dheeraad ah haddii Uu arko in ay tahay lagama maarmaan inta lagu gudo jiro sannad maaliyadeedka.

3. Haddii Golaha Wakiilada la kala diro ama mudadiisu dhamaato saddex bilood ka hor bilawga sannad maaliyadeed kasta, odoroska sannad maaliyadeedkaasi waxaa la hordhigi karaa Golaha Wakiilada sida ugu macquulsan ka dib bilawga sannadkaas

4. Qoondada Kharashka ee ku jirta odoroska, ee aan ahayn kharashka sharciga ah, waxaa lagu dari doonaa Xeerka sharci ee Qoondada kaasi oo ku sababi doona Golaha Wakiilada si ay uga bixiso qadiyada Dakhliga Guud xadiyada muhiimka u ah dakhligaas iyo qoondaynta xadiyadaas ujeedada lagu cayimay Xeerka sharci dhexdiisa.

5. Xeer sharci kasta oo loo gudbiyo Golaha Wakiilada waxaa la socon doona tusmada soo jeedinta miisaaniyadda, haddii ay jiraan wax ku saabsan dakhliga iyo kharashka muddo aan ka yarayn laba sano ka dib dhaqan galkeeda

8. Report on Loans, Grants, and Guarantees

(1) The Minister at the time of presentation of the Finance Bill to the House of Representatives, shall cause to be presented information relating to the total indebtedness of Somaliland in that financial year showing, *inter alia*:-

- (a) The total principal and the sources of loans and debts;
- (b) The accumulated *Sharia* compliant benefit mechanism on each loan and debt;
- (c) Provision made for servicing or repayment of each loan and debt; and
- (d) the utilization and performance of each loan and debt, including the extent of the achievements of the objective targets of each loan and debt.

(2) The Minister at the time of presentation of the Finance Bill to the House of Representatives, shall cause to be presented information relating to the total sum of grants extended to Somaliland, and their sources, showing their utilization, and performance of each grant, including the extent of the achievements of the objective targets of each grant.

(3) The Minister at the time of presentation of the Finance Bill to the House of Representatives shall cause to be presented information relating to all guarantees of loans, debts and grants to ministries, departments, agencies, local or regional government or a public body.

9. Supplementary estimates

(1) Where in respect of any financial year, it is found that the amount appropriated by an appropriation Act is insufficient, or that a need has arisen for expenditure for a purpose for which no amount has been appropriated by that Act, a supplementary estimate, showing the amount required shall be laid before the House of Representatives, and the expenditure votes 11 shall be included in a supplementary appropriation bill to be introduced in House of Representatives to provide for their appropriation

8. Warbixinta Amaahaha, Deeqaha, iyo Dammaanadaha

1. Wasiirku wakhtiga uu u soo jeedinayo Xeerka sharci ee Maaliyadda Golaha Wakiilada, wuxuu soo saarayaa in loo jeediyo warbixin la xidhiidha isku gaynta daynta Somaliland sannad maalyadeedkaas oo tusinaya *waxkastoo kale oo lagu daro kuwan*;
 - a. Isku gaynta raasamaalka iyo ilaha amaahaha iyo daynta;
 - b. Xaddiga ku ururay oo ah qaab faa'iido oo waafaqsan *Shareecada* ee amaah kasta iyo dayn kasta;
 - c. Waxa loogu talagalay bixinta ama dib u bixinta dayn kasta iyo amaah kasta;
 - d. Isticmaalka iyo wax qabadka amaah kasta iyo dayn kasta oo la soo qaatay, iyo ilaa xadkee la gaadhay hadafyadkii bartilmaameedka ahaa ee dayn kasta ama amaah.
2. Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo xeerka Sharci ee Maaliyadda Golaha Wakiilada waa inuu samayn doonaa warbixinta la xidhiidha qadarka guud ee deeqaha la siiyay Soomaaliland, iyo ilahooda, taas oo muujinaya isticmaalkooda, iyo wax qabadka deeq kasta, oo ay ku jirto illaa iyo xadka la gaadhay hadafyadii bartilmaameedka ahaa ee deeq kasta
3. Wasiirku wakhtiga uu u jeedinayo xeerka sharci Golaha Wakiilada, waxa ku jiri doona warbixin la xidhiidha dhamaan deeqaha, amaahda, daynta iyo deeqaha wasaaradaha, waaxaha, wakaaladaha, dawladdaha hoose iyo gobolada ama haay'adaha dawladda.

9. Miisaaniyad Kaabista

1. Haddii sannad maaliyadeed gaar ah, la ogaado in xaddiga uu qoondeeyey Xeerka qoondadu aanu ku filnayn ama ay soo baxday baahi aan wax kharash ah aanu u qoondayn Xeerka Qoondadu, odoros kaabis ah, oo muujinaya xaddiga looga baahanyahay ayaa la hordhigi doonaa Golaha Wakiilada, iyo diwaanka kharashka waxaa lagu dari doonaa Xeerka sharciga qoondada kaabista oo la soo hordhigi doonaa Golaha Wakiilada si loo helo qoondayntooda.

(2) A supplementary estimate prepared under Sub-section 8 (1) of this Act shall indicate any effect on the financing requirements of Government submitted under paragraph (a) of Sub-section 8 (1) of this Act and any expected changes to the statement provided under sub-paragraph (iii) of paragraph (b) of Sub-section 8 (1) of this Act.

10. Classified expenditure

(1) In the interest of security, there may be classified expenditure items within the budget of the ministry responsible for defense, ministry responsible for internal affairs, and ministry responsible for the Presidency, which will not be open to the general scrutiny of House of Representatives.

(2) Only designated expenditure items within the budgets of ministries in Sub-section 11 (1) of this Act may be treated as classified.

(3) Regulations under this Act relating to classified expenditures will define expenditure items that qualify to be treated as “classified expenditures” and will require approval of the House of Representatives.

(4) Classified expenditures shall be budgeted for within the budgets of ministries in Sub-section 11 (1) forming part of their budget ceilings, and cannot be extra-budgetary.

(5) The Minister will only avail details on classified expenditure items to the Speaker of the Assembly and the Chairperson of the Committee on economy and budget.

(6) The audit of the classified expenditures shall be done by the Auditor General and a classified audit report submitted to the President, the Speaker of the House of Representatives, and the Chairperson of the Public Accounts Committee

2. Odoroska kaabista ah ee lagu diyaariyay sida ku xusan xubinta (1) waxa lagu muujin doonaa saamayn kasta oo ku saabsan waxyaabaha looga baahanyahay maal galinta dawladda ee la gudbiyay ee ku xusan faqrada (a) ee Xubinta (1) ee Qodobka (8) ee Xeerkan iyo isbedel kasta oo la filayay oo warbixinta lagu bixiyay Xubinta (iii) ee faqrada (c) ee Xubinta (1) ee Qodobka (8) ee Xeerkan.

10.Kharashyada Qarsoodiga ah

1. Iyadoo la tixgalinayo danaha amaanka, waxaa jiri kara kharashyo qarsoodi ah oo ku jiri doona miisaaniyadda Wasaaradaha masuulka ka ah aarrimaha gaashandhigga, gudaha, iyo madaxtooyada kuwaas oo aan u furnaan doonin lafo-guridda guud ee Golaha Wakiilada.
2. kharashyada la xidhiidha Wasaaradaha ee ku jira miisaaniyadda ku timaamam qodob hoosaaka (1) ee xeerkan keliya ayaa loola dhaqmi karaa qarsoodi.
3. Nidaam hoosaad hoos imaanaya Xeerkan ee la xidhiidha kharashaadka qarsoodiga ah ayaa qeexi doona madaxyada kharasheed ee u qalma inloola dhaqmo “kharash Qarsoodi ah” waxaanu u baahan doonaa ansixinta Golaha Wakiilada.
4. Kharashaadka qarsoodiga ah waxaa la gelin doonaa miisaaniyadda, waxayna gali doontaa miisaaniyadda wasaaradaha ku xusan Xubinta 11 (1) taas oo ka mid ah miisaaniyadda u qoondaysan, mana noqon karaan kuwo aan miisaaniyadda ku jirin.
5. Wasiirku wuxuu tusi karaa oo kaliya madaxyada kharashka qarsoodiga ah Gudoomiyaha Golaha Wakiilada iyo Gudoomiyaha Guddida Dhaqaalaha iyo Miisaaniyadda.
6. Baadhista kharashaadka qarsoodiga ah waxaa samayn doona Hanti-dhawraha Guud iyo warbixinta qarsoodiga ahna waxaa loo gudbin doonaa Madaxweynaha, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, iyo Gudoomiyaha Guddida Xisaabaadka Dawladda.

11. Excess expenditure

- (1) Where at the close of accounts for any financial year, it is found that moneys have been expended:-
- on any expenditure vote in excess of the amount appropriated for it by an appropriation act;
 - for a purpose for which no moneys have been voted and appropriated; or
 - in excess of the sum assigned to an estimate forming part of an expenditure vote in the estimates of expenditure approved by the House of Representatives for the financial year, and to which no further sum has been applied under this Act or any regulations issued under it, then the amount of the excess expended, or not appropriated, as the case may be, shall be included in a statement of expenditure in excess which shall be laid before the House of Representatives and referred to the Public Accounts Committee of the House of Representatives.
- (2) The Public Accounts Committee of the House of Representatives shall report to the House of Representatives on a statement of expenditure in excess referred to it under Sub-section 12
- (1) of this section within two months after it has been referred to it
- (3) Where on receiving the report of the Public Accounts Committee mentioned in Sub-section 12 (1), the House of Representatives, by means of a motion, allows the excess or the amount expended but not appropriated, to stand charged to public funds, the sum shall be treated as excess expenditure and shall be included in a supplementary appropriation bill for appropriation.
- (4) Any excess or any amount expended but not appropriated and which is not allowed in terms of Sub-section 12 (3) of this Act, shall be treated as a loss of public moneys and dealt with in accordance with Sub-section 53 (3) of this Act.

11.Kharashka Dheeraadka ah (Excess Expenditure)

- Haddii xisaab xidhka ku saabsan sannad maaliyadeed gaar ah, la helo in lacag la kharash gareeyey:-
 - Kharash kasta oo ka bata qadarkii uu u qoondeeyay Xeerku Qoondadu;
 - Arrin aan wax miisaaniyad ah loo qoondayn loona kharash gelin; ama
